# SIDA LOO ADEEGSADO KAARKAAGA INTERNETKA

## 1. Ka shaqaysii kaarkaaga - WA QASAB

Markaad ka shaqaysiiso kaarkaaga, $360.45 ayaa diyaar ku ahaan doonta si aad isla markaba u isticmaasho. Wac **855-274-9934** una diyaar garoow inaad geliso nambarka 16 ka god ah ee kaarkaaga, taariikhda kaarku dhacaayo (oo loagu asteeyay "dhacaaya ilaa" iyo bisha/ sanadka) iyo koodhka amaanka ee ku qoran dhabarka danbe ee kaarkaaga. Arag tusaalaha.

Samayso nambarkaaga aqoonsiga shaqsiga ah (BIIN) oo sheeg in aad nambarka doonaayo in lacagaha mustaqbalka laguugu shubo. Haddii qof kale uu iibab sharci daro ah ku sameeyo kaarkaaga ama BIIN kaaga, Magaalada Portland kuumasoo celin karto lacagaha kaa maqan. Biinkaaga waxaad ku badali kartaa taleefanka.








## 2. Diiwaan geli kaarkaaga

Si aad u diiwaan geliso, sii magacaaga iyo ciwaankaaga si amaan ah bangiga **www.usbankrewardscard.com/web/usbankcorporaterewards/login** ama **855-274-9934**.

Talaabadaan ayaa loogu baahan yahay lacagaha lagu diro internetka, taleefanka iyo boostada, laakiin QASAB KUMA AHAN iibabka shaqsiga ah. Arintaan waxaa sabab u ah in inta badan ganacsatadu ay hubiyaan xogta biilka ee aad siisay ayagoo eegaaya xogta ku qoran kaagaaga bangiga. Iskuday inaad isdiiwaan geliso si aad uga hortagto inaad qaado caabuqa COVID-19 intaad wax iibsanayso.

Si aad u ogaato qaabka bangigu u maareeyo xogtaada shaqsiga ah, ka fiiri xeerkooda arimaha sirta ood ka helayso **www.usbank.com/about-us-bank/privacy**.




## 3. Go'aanso sida u adeegsanayso lacagahan


Xasuusnoow inaad balan qaaday inaad lacagahaan u adeegsato baahiyaha khadka internetka ee tignooloojiyada.

Dib lacag uguma shubi kartid kaarkaaga, ma iibin kartid, mana u adeegsan kartid inaad lacag kala baxdo ATM. Waxaad u adeegsan kartaa inaad lacag ku bixiso ama horay ugusii bixiso. Akhri heshiiska kaarkaaga. Markaad saxiixdo aadna adeegsanayso kaarkaaga waxaad aqbalaysaa shuruudihiisa.

**Ku bixi qarashka** - U adeegso lacagtaada inaad ku dhiibto marka laguusoo gudbiyo biilka adeegga, ama dhawr iibsi markaad u baahato.

**Lacag hordhac ahaan ugu bixi** - Haddii iibiyuhu ogol yahay, ku xiro kaarka qaabka lacag bixinta si aad halmar iskugu dhiibto biilka xiliyo kaladuwan aad isticmaalayso. Tani waxay ka dhigan tahay inaad dhiibayso lacag hormaris ah oo dhan ilaa cadakda kaarku qaado, taasoo badanaa ka dhigan inaad lacagta kaarka ku jirta halmar adeegga ku bixin karto.

Dhiibista qarashka adeegga kadib iyo adeegga kahor ayaad u adeegsan kartaa biilka khad internet horay u jiray ama midka hadda iyo/ama adeeg cusub.




*Haddii aad doonayso xog ku saabsan helitaanka adeegyada internetka oo aqbalaaya kaarkaaga ayadoo laga eegaayo baahiyahaaga hadda ka fiiri ilaha tababarka barta:*

**www.smartcitypdx.com/covid-19-digital-divide-response**

# KAARARKA INTERNETKA
# SU`AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

**S`uaal: Waa maxay nooca kaarkaan?**

Jawaab: Waa kaar aan lacag Kale lagu shubi karin, oo kaarka Visada bangiga ah (maahan kaarka daynta). Marka lagasoo tago magaciisa, wax xariir ah lama lahan wax barnaamij abaalmarino bixiya ah.

**S`uaal: Goorma ayuu kaarkaygu dhacayaa?**

Jawaab: **Kaarkaagu wuxuu shaqayn doonaa ilaa maalinta u danbaysa ee bisha uu dhacaayo**. Labo iyo tobanka bilood ee sanadka kadib marka kaarkaaga lasoo saaray lacag dhan $3 ayaa laga jarayaa lacagta uu jirtay ilaa uu kaarku ka dhaco. Lacagta la goosto waxay joogsanaysaa marka lacagtu kaarka ka dhamaato.

**S`uaal: Lacagahaygu ma dhacayaan?**

Jawaab: Haa. **Haddii ay jiraan sadex sano oo koontadu aysan shaqaynayn lacagaha ku jira ayaa lagu celin karaa dawlada**. Nidaamkaan waxaa loogu yeeraa escheatment. Ka akhri xog dheeraad ah oo ku saabsan qarashaadka heshiiska kaarkaaga.

**S`uaal: Xagee ayaan ku isticmaali karaa kaarkayga?**

Jawaab: Kaarkaaga ayaad ku isticmaali kartaa tafaariiq gade kasta oo ku yaala Gobalada Maraykanka iyo Degmada Columbia oo aqbalaaya kaararka baanka e Visada.

**S`uaal: Kaarku ma lahaan karaa baaqi naaqus ah oo ay qasab tahay inaan soo mago?**

Jawaab: **Badanaa wax dhaca maaha**, maadaama lacago kasta oo ka badan baaqiga kaarka ku jira la diidi doono.

**S`uaal: Maxaa dhacaaya haddii aan kaarku dabooli karin qarashka guud ee iibka aan doonaayo?**

Jawaab: **Ka codsado ganacsadaha inuu lacagta u kala qaybiyo** baaqiga kaarka kuugu haray iyo qaabka kale ee lacag bixinta. Waa inaad sheegtaa cadadka ay tahay inuu ka bixiyo.

**S`uaal: Sidee ayaan ku hubinayaa cadadka lacagta ii hartay (baaqiga)?**

Jawaab: Taleefanka | **1-855-274-9934**
Oonleenka | **www.usbankrewardscard.com**

**S`uaal: Xagee ayaan ku wargelinayaa kaarka lumay ama la xaday?**

Jawaab: Wac 855-274-9934 si dhakhso ah. **Kaararka waxaa lagu cusboonaysiin qarash dhan $15** lacagtaana waxaa laga jarayaa lacag kasta oo ku hartay baaqigaaga. Fadlan meel amaan ah ku xafid kaarkaaga iyo xogta BIIN ka. Waxaa lagaa doonayaa inaad sheegto magacaaga, nambarka kaarka, iyo taariikhda lacagaha aad dhawaan bixisay.

**S`uaal: Waxaan ahay qof naafo ah, ma wici karaa bangiga?**

Jawaab: **Haa**, way aqbalaan wicitaanada dadka naafada ah.

**S`uaal: Waa maxay caawimaadaha aan Af-Ingiriiska ku bixin ee bangigu baxsho?**

Jawaab: Waaxda Adeegyada Kaarka ayaa leh dookhyada khadka taleefanka ee Isbaanishka ku baxa. Abka taleefanka ee US Bank ayaa kuu sahlaaya inaad xogtaada ku gudbiso Isbaanish, laakiin xogta dhan kuma baxdo luuqadaas. **Marka taageero gaar u ah luuqad/dhaqan aan la heli karin, waydii ururka ku siiyay kaarka**.

## SU'AALO MA QABTAA?

Wixii caawimaad dheeraad ah,
nagalasoo xariir cinwaanka
**connectingportland@portlandoregon.gov**